


**Qaamuuska Ereyada Kursiga Ammaanka Caruurta**

**Iskuxiridda 3da meelood:** Qaab wareegsan oo ammaan ahaan saddex meelood isku xiraya: laba garbaha ah iyo hal lugaha dhaxdooda ah.

**Iskuxiridda 5ta meelood:** Qaab wareegsan oo ammaan ahaan shan meelood isku xiraya: laba garbaha, laba miskaha ama simaha ah , iyo hal lugaha dhaxdooda ah.

**Salka (ee kursiga cunugga):** Kursiga cunugga qaybtiisa hoose oo saaran kursiga gaariga. Salka siibmaya ayaa la socda kuraasi badan ee caruurta oo leh meel lagu rakibo oo aan dhaqaaqaynin taaso fursad u siinaysa in marna laga saaro marna lagu celiyo gaariga ayaadoon markasta la samaynin meel cusub ee lagu rakibo.

**Marinka ama jidka suunka:** Meesha ay warshadda leedahay waa in suunka ammaanka la mariyo ama lagu wareejiyo si cunugga loo xakameeyo.

**Isticmaalka ugu fiican:** Fikradaha ku aaddan isticmaalka ugu fiican oo la aqbli karo marka safar la galinayo cunug leh da', joog, korrimada jirka, iyo dabeecadda dhiman. Isticmaalka ugu fiican waa mid ku kala duwan marka la eego xaladaha dhabta ah.

**Kuraasida kor loo qaaday:** Waxa isticmaal si kumelgaar ah marka suunka dhabta iyo kan garabka ay caruurta waaweyn qaarkod ay ka gudbaan kuraasida badalmaya (illaa 40 rodol). Kursiga kor loo qaaday wuxuu kor u qaadaya cunuga si markaasi suunka dhabta iyo kan garabka ay si fiican u le'ekaadaan. Waxaa jira kuraasida dhabarka buuxinaya, oo loo sameeyay gawaarida leh kuraasida dhabarka uu gaabanyahay ama aan lahayn wax madaxa xakmeeya, iyo dhabarka aan lahayn; leh qaybta hoose ee kursiga kor loo qaadayo. Waxaa kaloo loo yaqaanna kursiga kor loo qaaday oo suunka lagu aaddinayo.

**Kursiga gaariga:** Magaca caadiga ah ee gaar ahaaan loo sameyay qalab loogu talagalay in cunugga ammankiisa gaariga lagu sugayo, dhowraya sharciyada ammaanka ee federaaliga, iyo kordhinaya badbaada cunugga haddii u shil dhaco.

**Biinka xabadka:** Biinka xabadka waa qalab isku haynaya suunka kursiga ammaanka ee cunuga ku wareegsan si markaasi isla booskaasi suunka uu si saxan cunuga ugu celiyo. Waxaa kaloo loo yaqaanna biinka xakameynta suunka.

**CPS:** Ammaanka cunugga raakaabka ah (Child passenger safety).

**Kursiga ammaanka cunuga ama kursiga gaariga:** Qalab lagu tijaabiyay shil ayaa loo sameeyay in ay cunuga ka badbaadisho shilka. Magaca guud oo loo bixiyay kursiga cunugga ee badalmaya, iskudarka, iyo kursiga kor loo qaaday.

**Kursiga iskudardka ah:** Waa noc kursi oo horey u jeeda ee cunuga xakameeya oo loogu talalgalay qaabka adkaynta suunka oo lagu dhowrayo cunugga kaddibna marka laga siibo suunka celinaya, loo isticmaalo mid dhabarka kor u qaada sii uu suunka ugu aado kursiga.

**Kursiga ammaanka cunugga ee badalmaya:** Kursiga cunugga xakameeya oo marna gadaal ujeedo uu laakiin haddana "u badalma" mid horay u jeeda ee loogu talgalay caruurta.

**Tubada foomka:** Waa waayar ah ama tuba oo dhexroorkiisu yahay 4-5 inji dhererkiisana yahay shan cagood. Kuwaan waxaa laga helaa waskooyinka lagu qubaysto iyo dukaamada qalabka caruurta ku ciyaarto. Waxaad goysaa qayb ballaca salka kursiga cunugga si aad ugu isticmaashid inaad kor u qaadid salka kursiga si aad ku heshid xagal ah 45 digirii. Waxaad kaloo isticmaali kartaa joornaall ama shukumaan la laalaabay, iwm, kuwaas oo isla hawshaas qaban kara.

**Kursiga ammanka cunugga ee horay kaliya u jeeda**: Qaab cunugga celiya oo

looogu talalgalay kaliya kursiga horey u jeeda oo loo saameyay cunug ugu yaraan jiira 1 sano iyo culasykiiska uu yahay 20 rodol.

**Biinanka celiya suunka:** Balastikada isku haysa suumaanka garabka oo si sokeysa isugu xiraysa xabadka cunuga oo la siman kilkilaha.

**Suun celiyaha:** Tan macneheedu waa suunka kursiga ee loogu talagalay inuu cunugga ku celiyo kursiga.

**Kursiga ammaanka ee ilmaha kaliya:** Qalabka ilmaha lagu celinayo looguna talagaly ilamaha kaliya inay isticmaalaan (caadi ahaan culeyskiisa uu ka yaryahay 17 - 22 rodol) oo dhinac u janjeera gadaal u jeeda.

**LATCH:** Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta (Lower Anchors and Tethers for Children). Habka cusub ee kursiga ammanka caruurta loogu rakibo gaariga ayadoon loo baahnayn sumaanka ammaanka.

**Biinka wax isku haya:** Waa macdan u eg xarafka H oo loogu talagay inay isku qabato wareegga suunka oo aan lahayn latch si markaasi looga hortago inay suumanka horay ugu durkaan.

**Xakameyayaasha hoose/habka xakamynta hoose:** Hab cusub ee kursiga ammaanka ee cunuga gaariga lagu rakibo ayaadoon aan la isticmaalaynin sumaanka ammaanka ee gaariga.

**Suunka ammaanka:** Suumanka isku laaban, xakameeyaha, iyo qalabka isku qabanayo oo celinaya qofka gaariga saaran. Mararka qaarkod waxaa loo yaqaanno suunka gaariga.

**Laabka kursiga:** Meesha ay isku yimaadaan salka kursiga iyo dhabarka kursiga. Isku-imaadk kore iyo hoose.

**Toosiyeyaasha suunka garbaha ama toosiyeyaasha nafaaska:** Qalabyo (qaar uu gaariga wato qaarkalena lagu daray) oo loo sameeyaya inad toosiyan suunka garbka si ay si dadban oo fiican garabka kale u gaaran halka ay qoorta ku dadbanaan lahayeen.

**Duleelada suunka garbaha ku celiya (Shoulder harness slots):** Duleelada gadaal uga yaalla kursiga cunuga celiya oo ah halka suunka garabka la mariyo.

**Suunka wax celiya:** Qalabka ama qalabka lagu rakibay oo loogu talagay inay kursiga cunugga celiyaan oo suunka kula qabanaya meelo loo sameyay ee gaariga kamid ah. Sunka wax celiya iyo jillaabka si toosan ayay ugu dheggan hakameyaha.

**Cad suunka ah:** Cad suunka isku laaban oo ku dheggan kursiga cunugga korkiisa ilaa qaybta gaariga. Wuxuu celiyaha ka reebaya inuu horay uu u dhaco marka uu gaariga shil galo waxaan la helayaa xooga nafis ah oo badbaado ah. Waa mid si khiyaar loogu daro karo ama gaariga la socota.

Waxaa Laga soo xigtay: Maamulka Ammaanka Gaadiidka Waddoyinka Qaranka, Waaxda Gaadiidka Maraykanka, Ammaanka Caruurta Adduunka (National Highway Traffic Safety Administration, U.S. Department of Transportation; Safe Kids Worldwide)